



Waxa La Fili Marka Kuugu Horeeysa ee aad Tagto Maxkamadda Muhaajiriinta (Immigration) ee Minnesota

(What to Expect the First Time You Go to Immigration Court in Minnesota)

Warqaddan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa waxa la sameeyo ka hor qaadida dacwo maxkamad muhaajirnimo (immigration) iyo waxa la fili kolka aad tagto maxkamadda. KAAMA ay caawinayso maxkamaddu inaad buuxiso foomam ama aad dalbato ogolaansho aad ku shaqeysyo. MA ay hayso akhbaar ku saabsan magangelyo, noocyoo kala duwan oo fiisooyin (visas) ah, ama barnaamijyo kale. Maktabada iskaa-isu-caawinta ee LawHelpMN waxa ay ku haysaa xog aruursan oo ku saabsan mowduucyaddaa barta lawhelpmn.org/self-help-library/immigration

Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

Eeg Haddii aad Dacwo Qaadid Leedahay

Waxa dhaca marka ugu horeeya ee aan tago maxkamadda muhaajiriinta (immigration)?

Maxkamadda Muhaajiriinta (Immigration) ayaa go'aamisa kiisaska dadka la masaafurinayo. Marka ugu horeeya ee aad tagayso maxkamadda waxaa aad u tagi waxa la yiraa **balanta qaadida dacwooyinka guud**. Kuwaasi waa dhagaysi dacwo oo kooban si loo ogado talaabooyinka xiga ee kiiskaaga. Maxkamadda muhaajiriinta (immigration) waa qayb ka mid ah hay'ad dowli ah oo siddoo kale la yiraa "Xafiiska Sare ee Dib u Eegida Muhaajinimada" (EOIR).

Ha gafin qaadida dacwadaadda!



Haddii aad gafto qaadida dacwadaada, **Xaakimku waxa uu amri in lagu masaafuriyo**. Kolkaa waxa aad khatar u noqon in lagu masaafuriyo markii la rabo. Tag balantaadda xataa haddii aadan lahayn qareen. U Sheeg maxkamadda marka walba oo aad guurto. Tani waxa ay hubin inaad hesho ogaysiisyada maxkamaddu kuu soo dirto.

Siddee ayaan ku eegi karaa inaad badan dacwo qaadid leeyahay?



Telefan. Wac khadka hay'adda EOIR ee ah **1-800-898-7180**. Geli Lambarkaaga-A (A-Number) ama "Lambarka Diiwaangelinta Ajnabiga (Alien Registration Number)." [Booqo barta immigrationhelp.org si aad u hesho Lambarkaaga-A (A-Number)]. Isticmaal taxaalka la kala dooranayo si aad u eegto maalinta iyo waqtiga dhagaysiga dacwadaadda. Khadadka lagu wada hadlaa waa afka Ingiriiska iyo Isbaanaash ka. Riix 2 si aad u hesho caawimaad afka Isbaanashka ah.



Khadka (Online). Booqo barta acis.eoir.justice.gov. Geli Lambarkaaga-A (A-Number). Eeg "Akhbaarta Qaadida dacwada ee soo socda" iyo "Akhbaarta la soo Xiriiridda Maxkamadda."

Ka eeg qof walba oo qoyskaaga ka mid ah oo leh lambarka-A (A-Number). Marmarka qaarkood balanta qaadida dacwadaha waxaa loo qabtaa maalmo kala duwan kiisaska kala duwan xataa haddii qaadida dacwaddu ay quseeyso dad isku qoys ah. Haddii **AADAN** lahayn balan dacwo qaadid oo laguu qabtay wali, wac ama eeg shabakadda (website) 1 mar maalin walba.

☰ Ka Hor Qaadida Dacwadaadda

Waa xaggee meesha dacwadayda lagu qabanayo?

Waxaa aad tagi kartaa goobta dhagaysiga dacwadda ama waxaa aad uga qaybgali kartaa fiidyow ahaan.



Tagida maxkamadda.

Raac talaabooyinka “Maalinta Dhagaysiga Dacwadaadda: Wuxuu La Fili Karo” ee qaybta warqadan xogta aruursan ah.



Fiidyowga Webex ee kumbuyuutar, telefan, ama loox (tablet) ah.

Xiriirka (link) waxaa dhici karta inuu la socdo ogaysiiska qaadida dacwada ee aad ka heshay maxkamadda. Booqo barta lawhelpmn.org ama mari (scan) kooda QR ka (QR code) si aad u hesho tilmaamaha Webex. Wuxuu ay xiriir la leedahay xaakim walba maxkamadiisa khadka ah.



Ciddee ayey tahay inay qaadida dacwadda timaado?

Cid walba oo qoyska ah oo leh dacwo qaadida waa inay tagto, oo ay ku jiraan ilmahu.

Waxaa aad waydiin kartaa xaakimka in ilmaha yaryari ay u baahan yihiin inay yimaadaam dacwo dhagaysiyadda kale ee mustaqbalka. Xaakimka waxaa laga yaabaa inuu dhahi ilmahu ha joogaan goobta sugida. Soo kaxayso qof si sharci ah ugu nool wadanka United States (qof haysta sharci) si uu u ilaaliyo.

Maxaan la imaadaa?


- Wax walba oo qoraalo (documents) oo mujaahirnimo oo aad haysato
- Wixii aqoonsi ah (ID), haddii aad haysato
- 3 nuqul (copies) oo ah wixii foomam ah ee aad soo gudbinayso
- Warqad iyo qalin si aad ugu qoro akhbaarta muhiimka ah
- Gal aad ku xafidato qoraaladda (documents) lagu siiyo

☰ Maalinta Qaadida Dacwadaada: Waxa La Fili

Waqtii intee le'eg ayaan soo hormaraa?

Tag maxkamadda 30-daqiilo ilaa iyo 1-saac ka hor waqtiga dhagaysiga dacwadaadda. Ku talagal inaad maxkamadda joogayso 4-saac. Dhagaysiga dacwadaadda waxaa dhici karta inay noqdo 15-daqiilo uun. Laakiin waxaa dhici karta inaad sugto muddo dheer inta uu ka bilaabmayo.

Siddee ayaan ku tagaa maxkamadda?



Mari kooda QR ka si aad
uga hesho tilmaamo
Khariidada Google.



Maxkamadda.

Fort Snelling Immigration Court
Bishop Henry Whipple Federal Building
1 Federal Drive, Suite 1850
Fort Snelling, MN 55111
Lmabarka Telefanka: (612) 725-3765, #0 ee soo
dhaweynta.



Barxada (Parking).

Waxaa jira meelo gawaarida la dhigto (parking) oo bilaash ah oo maxkamadda horteeda ku yaal. Sii mar saldhiga ilaaladda si aad u gaarto barxadda. Tus aqoonsigaaga (ID). Waxaa kaloo jira barxaddo kale oo u dhow Fort Snelling Station N.



Tareenka.

Maxkamadda waxa ay u dhowdahay goobta **Fort Snelling Station N**. Joogsigan waxa ay ku taal goobta Twin Cities Metro Transit Blue Line. Booqo barta: metrotransit.org si aad u ogaato jidka ugu fiican.

Xaggee ayaan ka tagaa maxkamadda gudaheeda?

Talaabadda 1: Sii mar ilaaladda.

Waxaa arki ilaalo meesha joogta kolkaa aad soo gasho maxkamadda. Wuxuu aad u baahan tahay:



Inaad iska bixiso kabaha iyo suunkaagaba. Jeebabkaana mari. **Geli wax walba oo aad wadatay mashiinka (x-ray).** Kuwaa waxaa ku jira talefanka gacanta, boorsadda, boorsada garabka. Ka soo saar kumbuyuutarada, looxadaha, iyo aaladaha korontadda ku shaqeyya boorsadaada. Ku rid weel gaar ah. Ha u soo qaadan wax hub ah maxkamadda. Ha soo qaadan, barafuunka, cedar ama ur bi'iyaha la isku buufiyo.



Dhex mar bir sheegaha. Haddii uu bir sheegahu uu qayliyo, ilaalada ayaa ku waydiin inaad lugahaaga iyo gacmahaaga aad kala fogeyso. Ul bir ah ayey jirkaaga oo dhan korka ka marin si ay u helaan birta qalabku sheegay. Bir sheegaha waxaa laga yaabaa inuu u qayliyey dahab aad gashan tahay awgii.

Talaabadda 2: Tag qolka sugida (qolka #1850) ka dibna is xaadiri.


Si aad ku tagto goobta sugida:

- **Bixida** u gal dariiqa koowaad kolka aad ilaalada dhafto. Leexo ka hor wiishashka.
- Raac dariiqa ilaa iyo dhamaadkeeda.
- Qolka sugida ee maxkamadda waxa uu kaa qaban bidixda. Waana qolka #1850.

Qolka sugida kolka aad tagto, iska xaadiri daaqadda warqada laga xareysto ama qofka fadhiya miiska. Qofku waxa uu ku waydiin lambarkaaga-A (A-Number) iyo in aad leedahay dacwo dhagaysi. Waxaa dhici karta inuu joogo ama uusan joogin qofka afka Isbaanashka ku hadla miiska iska xaadirinta.

Talaabada 3: Joog qolka sugida ilaa lagaaga yeerayo inaad maxkamada gasho.

Ciddee ayaa maxkamada joogi doonta xilliga dacwo qaadida?



-  **Adiga.** Shaqadaaddu waa inaad u sheegto xaakimka sababta ay tahay inaad u joogto wadanka United States.
-  **Qareenka dowladda.** Shaqadiisu waa in lagu masaafuriyo. Waa uu kaa soo horjeedaaan adiga. Waxaa uu joogi karaa maxkamada ama waxa uu ku soo geli fiidyow.
-  **Xaakimka.** Shaqadiisu waa inuu dhagaysto adiga iyo qareenka dowladda. Xaakimku waa qofka go'aansada in lagu masaafuriyo iyo in kale. Waana dhexdhxeAAD. Waxaa uu joogi karaa maxkamada ama waxa uu ku soo geli fiidyow.
-  **Turjubaan.** Qof kaa caawiya inaad maxkamaddu kula hadasho afka aad doonayso inaad isticmaasho. Waxaa uu joogi karaa maxkamada ama waxa uu ku soo geli fiidyow.
-  **Dadka fadhiya gadaalka maxkamadda.** Waxaa dhici karta inay sugayaan qaadid dacwo iyagu ay leeyihiiin. Waxay kale oo noqon karaan tabarucayaal meesha u jooga inay hubiyaan in xaquuqda dadka aan lagu xadgudbin.

Maxaa dhici xilliga qaadida dacwooyinka badan?

Wax walba oo la yiraa xilliga qaadida dacwadda waa la duubi. Uga jawaab su'aal walba oo xaakimku ku waydiiyo si daacadnimo ah.

Xilliga qaadida dacwada, xaakimku:

- Waxa uu yiraa **taariikhda** iyo magaca maxkamadda.
- **Isu kiin sheegaa cida uu yahay**, adiga, turjubaan, iyo qareenka dowladda.
- Waxa uu ku waydiyaa **su'aalo aasaasi ah** adiga sidda:
 - Ma noo xaqijin kartaa magacaaga, ciwaankaaga iyo afka aad badanaa jeceshahay inaad isticmaasho? (Xaakimku waxa uu kuu sheegi sidda looga cusboonaysiyo ciwaankaaga maxkamadda haddii loo baahdo.)
 - Ma heshay Ogaysiska ah inaad Timaado halkan?
 - Ma leedahay qareen? Ma rabtaa waqtii aad ku hesho qareen in lagu siiyo?
 - Ma og tahay sababta aad maxkamadda maanta u timi?
 - Wax su'aal ah ma ii qabtaa aniga?
- Waxa uu siin adiga liis ah meelaha aad tagi **karto si aad uga hesho qareen aad la hadasho oo bilaash ah**.
- Waxa uu ku waydiin su'aalo si u eego **Barnaajiyadda aad xaqqa u yeelan karto**. Waxaa dhici karta inuu ku waydiiyo:
 - Ma ka cabsanaysaa inaad ku noqoto wadankaaga aad u dhalatay?
 - Ma leedahay ilmo, waalid, ama xilo muwaadin Mareykan ah (U.S.) ah ama sharci deganaasho ramsi ah leh?
 - Muddo intee le'eg ayaa joogtay wadankan United States?

Xilliga Qaadida dacwadda, waa aad:

- Waydiinsan kartaa xaakimka turjubaan kuu **turjuma** afka aad rabto inaad isticmaasho.
- Waydiisan kartaa xaakimka inuu maxkamadda **uu ka saaro dadka kale** haddii aad rabto in xogtaadu qarsoodi kuu ahaato. Waxed u rabi kartaa qarsoodiga si aad uga hadasho dagaal qoyska dhexediisa ah, ku takrifalasho dhanka galmaadda ah ama arrimo la xiriira caafimaadka xiska.
- Waydiisan kartaa xaakimka inuu ku siiyo **waqtii dheeraad ah** oo aad ku hesho qareen.
- U sheeg xaakimka haddii **ciwaankaagu uu isbedelay**.
- **Xaree foomam** haddii jaa horey aad u haysatay.
- Waydiin kartaa xaakimka **nuquladda foomamka** aad u baahan tahay, sidda codsiga magangelyadda ama foomka bedelida ciwaanka.
- Waydiin kartaa xaakimka in ilmahaaga yari uu u baahan yahay inuu yimaado dhagaysiga dacwadooyinka ee mustaqbalka iyo in kale.

Ka waran hadii aanan diyaar u ahayn isticmaalka afka Ingiriiska?

Xilliga dacwadaada la qaadayo, waxa aad xaq u leedahay inaad ku hadasho afka aad doonayso inaad isticmaasho. Maxkamaddu waa **khlasab inay kuu keento turjubaan**. U soo kaxayso qof aad aaminsan tahay oo ku hadla afka Ingiriiska goobta dacwo qaadida si uu kaaga caawiyo waydiisiga in turjubaan laguu keeno. Wuxuu aad codsan kartaa in mar kale lagaaga dhigo dacwo qaadida haddii turjubaan uusan joogin. Ha ka ogolaan inay kugu jajuubaan in dacwada lagu qaado afka Ingiriiska.

Ka Dib Qaadida Dacwada Hore

Maxaa sameeyaa marka xigta?

Ka dib dhagaysiga dacwadaadda hore, waxay u badan tahay xaakimku inuu qabto balan kale oo dacwo dhagaysi ah. Waxa ayna dhici taasi dhowr bilood ka dib. **Ka hor dhagaysiga dacwadaada ee soo socota, la tasho qareen laanta socdaalka (immigration)** qaabilسان. Waxa ay waydiyaan su'aalo dadka si ay u eegaan magangelyadda ay dhici karto inaad xaq u yeelato. Qareenku siddoo kale waxa uu ku siin karaa mudooyinka kama dambaysta ah ee la rabo inaad dacwada xareysato.

Ka wac qareen bilaash ah liiska xaakim ku siiyey. Wuxaa kaloo ka baari kartaa qareeno bilaash ah barta LawHelpMN.org. Qareenada bilaashka ah cid walba ayaa aad u rabta. Laguma siin karo hubaal ah inaad heli qareen bilaash ah hadii aad codsato. Waxa aad qabsan kartaa qareen jeebkaaga ah haddii aad awoodo. Xaakimku waxaa dhici kartaa inuu yiraa, "Ha ku soo noqon maxkamadda qareen la'aan." Taasi waa khalad. **Haddii aadan helin qareen, wali waxa aad u baahan tahay inaad tagto dacwo qaadidaada labaad**. Waa isu hadli kartaa adigu haddii aadan heli karin qareen ku caawiya.

Magangelyo nooce ah ayaan codsan karaa si la iigu ogolaado inaad joogo wadanka United States?

Qaraan ayaa kuu sheegi kara magangelyadda aad xaqqa u leedahay. Sidda inta badan lagu sharci waa in la dalbado:

- **Magangelyo.** Waxaa dhici karta inaad xaq u leedahay magangelyo haddii aad ka cabsanayso inaad ku noqoto wadankaaga aad u dhalatay waayo in wax lagu yeelay ama wax lagu yeeli doono iyadoo sababtu tahay jinsiyadaada, caqiidadaada, qowmiyadaada, ra'yi siyaasadeed ama ka tirsanaan urur bulsho oo gaar ah. **Waxa aad u baahan tahay inaad ku codsato magangelyo 1 sanno gudahood markii ugu dambaysay ee soo gashay wadanka United States.**

- **Tusaale ahaan:** Marco wuxuu markii ugu dambaysa soo galay wadanka United States bishii Febraayo 1, 2024. Goorma ayey tahay inuu dalbado magangelyo? **Waa inuu dalbadaa ugu dambayn bisha Janaayo 31, 2025.**
- Waa inaad wali iska dalbato xataa haddii sannad ka badan wadanka aad joogtay. Waxaa jira waxyaabo laga reebo shuruudaa, sidda arrin caafimaad oo kale. Booqo barta immi.org si aad uga hesho akhbaar dheeraad ah.
- **Fiisaha U (U Visa).** Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato Fiisaha U (U visa) la yiraa haddii aad tahay dhibane dambi weyn loogu gaystay wadanka (U.S.) aadna la shaqeysay laamaha sharci ilaalinta ee (U.S.). Dib u eeg warqada xoga aruursan ee “dhibayaasha Dambiyada laga galo iyo Fiisaha U (U Visa.)” Ee LawHelpMN’s ([fact sheet on “Victims of Crime and U Visas.”](#))
- **Martabadda Sharci Siinta Gaarka ah ee Kurayda Masaakiinta ah.** Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato barnaamijkan haddii uu kugu tacadiyey, uu ku dayacay ama ku dayriyey waalidkaa. Waa inaad ka yar tahay 21-sanno jir. Eeg warqadda xoga aruursan ee “Martabada Sharci siinta Gaarka ah ee Kurayda Muhaajiriinta ah.” Ee LawHelpMN ([fact sheet on “Special Immigrant Juvenile Status.”](#))

Ma shaqeyn karaa inta aan sugayo dacwo qaadidayda?

Waxa aad u baahan tahay ogolaansho inaad ka hesho dowladda si aad u shaqeyso. Booqo barta Visit uscis.gov/i-765 si aad wax badan uga ogaato arrintan.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho Kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqlu kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.